

09/03/2015

# SUGNAANTA DHAQAALAHA

**Sugnaanta dhaqaalaha wuxuu ku saabsanyahay soo celinta hab-nololeedyada dhibbanyaasha colaada hubeysan iyadoo la deegsanaayo hab labadaba ay yihiin kuwa waara sharaftooduna ku ixtiraamantahay.**

## GARGAAR LACAGEED OO LOOGU TALAGALY XOOJINTA ADKEYSIGA BARAKACAYAASHA




Xxxxxxxx


Faadumo iyo qoyskeeda waxay ka qaxeen colaada hubeysan ee Muqdisho sannooyin badan ka hor. Tan iyo waqtigaas waxay ku noolyihiin xero barakacayaal ku taalo magagaalada Beledweyne, Gobolka Hiiraan ee bartamaha Soomaaliya. Faadumo nolosha xerada aad bay ugu adkeyd maadaama lagu qasbay in u tashato qoyskeeda.

"Mar mar markaan bannaanka u shaqo tago guriga anigoo maran ayaa ku soo laabtaa, mararka qaarkoodna wax yar caruurta aanku quudiyo ayaan helaa. Rabitaankeygu wuxuu ahaa in aan furto dukaan yar aan ka iibiyo alaabta asaasiga ah sida sokor, saliid ama caleen shah. Dadka halkaan joogo nusu saac ayey magaalada u socdaan si ay u tagaan dukaanka ugu dhow," Faadumo ayaa tiri.

Mashruuca taageerada kaashaka ee ICRCda waxaa loogu talagaly haweenka nugul sida Faadumo oo kale. Qoysaska rabi lahaa in ay sameystaan dhaqdhaqaa dakhli dhalin ah laakinse haysan lacagtii lagu bilaabi lahaa. Mashruuca waxaa loo qaabeeyey in uu dhiso adkeysi.

Lacagta waxaa lagu gudbiya adeegga xawilaada telefoonada gacanta lagu qaato. Hannaankan ICRCdu waa ay ka heshay maadaama sameyntiisa ay fududahay, deg degg ah hadana xaqiijinaaya in lacagta gaartay dadkii loogu talagalay.

Faadumo waxay ka mid tahay 875 haween ka faa'ideystay mashruuca taageerada lacagta kasha ah oo laga hirgeliyey xerada Beledweyne. Bishii Luulyo sannadkii hore(2014), ICRCdu waxay xero barakacayaal ku taalo Kismaayo ka hiregelisay mashruuc kan la mid ah oo ah mashruuca shardiyeysan taageerada lacagta kaasha kana faa'iday 300 haween nugul oo qoyskooda madax u ah.




Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo **www.blogs.icrc.org/somalia/so**

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org